



## **Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **Hadal Qoraal uu ka soo saaray Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud Ansaxinta Xubnaha Golaha Wasiiradda**

Muqdisho, 13 Nofember 2012 – Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Dr. Agostine P. Mahiga ayaa soo dhoweeyay sida xooga leh ee ay xubnaha Baarlamaanka Fedraalka Soomaaliyeed u ansaxiyeen golaha wasiirada ee uu soo magaccabay a’iisul Wasaare Cabdi Farax Shirdoon 4tii Nofember.

“Tani waa tallaabo kale oo muhim u ah taariikhda Soomaaliya” ayuu yiri ergayga gaar ah Mahiga. “Magaacabista la magacaabay wasiiro sidan u tira yar ayaa waxay caddeyneysaa sidey uga go’an tahay hoggaanka ummadda Soomaaliyeed inay ka guuraan qaabkii horay loogu fakari jiray isla markaana uu keeno is bedel loo qaadaayo dhinaca wanaagsa. Waxaan si gaar ah ugu faraxsanahay magaacabista taariikhda leh ee loo magacaabay laba haween ah jagooyin heerkooda sareeyo sida Ra’iisul Wasaare ku xigeen iyo Wasiirka Arrimaha Dibadda iyo Wasiirka Horumarinta iyo Adeega Bulshada.”

“Waxaan ku amaanaayaa Ra’iisul wasaare Shirdoon iyo Madaxweyne xasan Shekh wada tashiyadii dheeraa ay la yeesheen dhamaan bulshada Soomaaliyeed ha ahaadeen kuwa jooga dalka gudihisa ama dibadiisa, wada tashiyadaas oo dhalay dowladdaan loo wada dhan yahay oo leh dhamaan claamadahii wanaagsanaa ee ay lahaan lahayd I xukuumad wanaagsan. Tallabadaan waxay ahayd falgal muhiimad leh laguna kasbanaayay kalsoonida ummadda. Xubnaha Golaha Wasiirada cusub waxay matalaayaan hab siyaasadeed balaaran oo kobaayaa bulshada oo dhan isla markaana ilaalinaaya isku dheelli tirka qabaa’ilka iyo sinaanta. Sidoo kalena golaha wasiirrada waxay ka turjumaayaan dhaqanka iyo xaqiiqda bulsho ee ka jirta Somaliya maanta.” Ayuu yiri ergayga gaarka ah.

“Waxaan u hambalyeynayaa dhamaan golaha wasiirada cusub anigoo u rajeynaya inay ku guuleystaan shaqada adage e hor taalla ayuu yiri Dr. Mahiga.” “UNPOS waxay sii wadi doontaa la shaqeynta ay la shaqeyneyso walaalaha Soomaaliyeed si loo hormariyo awoodda wax qabad ee dowladda, dib u heshiisiinta siyaasadeed, xoojinta arrimaha amniga iyo garsoorka sidoo kalena ay u fududeyso dib u dhiska gaar ahaan dhulkii dhowaan la xureeyay taasoo waafaqsan barnaamijka lixda qodob ee madaxweynaha soo ban dhigay.”

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir Saraakiisha UNPOS u Qaabilsan Isgaarsiinta Guud

Nick Birnback, + 254 41 350 6855 (Office) or + 254 739 976 888 (Mobile)

Fadlan eeg rugta Internet-ka:

<http://www.unpos.unmissions.org>  @UNPOSomalia  unposomalia.tumblr.com  flickr.com/photos/unpos



## **Xfiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

“Sidoo kale waxaa jeclahay inaan mahad u cliyo xubnaha Golaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed kuwaasoo si hufnaan iyo dimoqaraadiyad ku dheehan tahay uga doodday xubnaha golaha wasiirada iyo qorshahooda shaqo. Codka kalsoonida ee ay bixiyeen xubnaha baarlamaanka waxay muujineysaa xiriirka cusub ee caafimaadka qaba ee ka dhaxeeya hay’adaha dowladda ee fulinta iyo sharci dejinta. Arrintaan waxay kale ay calaamad u tahay iney jiraan hoggaan aqoon leh, mideysan oo ayna ka go’an tahay in mustaqbal ummadda Soomaaliyeed uu ahaado mid ifaaya oo ay rajo ku dheehan tahay.”

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir Saraakiisha UNPOS u Qaabilsan Isgaarsiinta Guud

Nick Birnback, + 254 41 350 6855 (Office) or + 254 739 976 888 (Mobile)

Fadlan eeg rugta Internet-ka:

<http://www.unpos.unmissions.org>  @UNPOSomalia  unposomalia.tumblr.com  flickr.com/photos/unpos